# FAAFINTA RASMIGA
# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 15 Feb. 1983 L. 1 r 2

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 2 ee 1 Jen, 1983. Oggolaansho Miisaaniyadda ku tala galka ee Dowladda ee Sannadka 1983.— BOG. 98

### QAYBTA LABAAD
### XEER

W. M.

### QAYBTA SADDEXAAD
### TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM

W.M.

Wakaaladda M. Qaranka

# QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

Sharci Lamb. 2 taariikh 1 Jen. 1983 Oggolaansho Miisaaniyadda ku tala galka ee Dawladda ee S. 1983.—

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA:

### Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyay in ay soo ururi so Dakhliga iyo inay bixiso kharajka ku qoran Miisaa niyadda halkan ku Lifaaqan iyadoo la raacayo Xeerar ka, Habka iyo Nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaa dka iyo Hantida Dawladda.

### Qod. 2aad

1. Isbeddelka guud ee Miisaaniyadda iyo kuwa ku saabsan Madaxyada Miisaaniyadda waxaa lagu soo saarayaa Sharciga.

2. Kala wareejinta ku saabsan Madax xigeenada isku ah waxaa awood loo siiyay Dawladda.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yi maada Madax xige walba waxaa awood loo siiyay Wa siirka Wasaarad walba, Kala wareejinta caynkan oo kale ee Miisaaniyadda Dawladda Hoose waxaa awood loo siiyay Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Go bol walba.

### Qod. 3aad

Miisaaniyadda loogu tala galay Mashruucyada Ho rumarinta iyo fulinta Qorshaha Qaranka waxaa loogu isticmaali karaa kaliya Mashruuc Horumarineed.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 1da Jennaayo 1983, Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1 Gen. 1983

MADAXWEYNAHA JDS.

Maxamed Siyaad Barre

# Warbixinta Miisaaniyadda 1983 ee Wasiirka Maaliyada
## Fassiraad Miisaaniyadda

Miisaaniyadda Qaranka ee ku talagalka Sannadka 1983 ee idin hor taalla· guddoonkiinana sugeysa, waa mid lagu qorsheeyey baahida dhabta ah ee Maamulka Dawladda iyo horumarinta Dalka·

Sidaa u aragtaan· ku talagalka Miisaaniyadda 1983 waxaa weeye Sh.So, 5·174,915·176 wuxuuna dheeryahay kan Sannadka 1982 ee hadda dabayaaqada ah Sh· So, 1·244·501,516. Miisaanivaddu waxay u kala baxdaa Da khli iyo kharaj· Dakhliga xoogiisu wuxuu ka soo galaa Canshuuraha dadban waana xaalad caado u ah Wadda mo soo korahaya ee dhaqaalahoodu uusan horay u ma rin weli· Hase ahaatee Wasaaraddu waxay waddaa bar naamij ay ku xooji nayso canshuuraha Toosan, sida Faa'iidatulfaa'iida· taasoo natiijo iyo horumar muuqda laga gaaray labadii Sannadood ee nasoo dhaaftay· Kha rajku wuxuu u kala qaybsamaa wixii la xiriira dhaqaa laha hawlaha guud iyo Mashaariicda· Markii si kale loo eegana· kharajka Miisaaniyaddu wuxuu u kala ba xaa arrimaha Siyaasadda iyo ammaanka. Horumarinta dhaqaalaha iyo arrimaha Bulshada·

Arrimaha la xiriira Siyaasadda iyo Nabadgelyada Kharajka ku baxaya waa Sh.So. 1·937·554·912 oo u dhig ma 37·4%, markii loo eego Sannadka 1982 waxaa ku si vaaday Sh·So, 631,680·244 oo la mid ah 48·4%; arrimaha Dhaqaalaha la xiriira waxaa ku baxaya Sh.So, 2·668,807 667 oo u dhiganta 51·6%; markii la barbardhigo Sanna dkan dhammaadky ah waxaa ku siyaaday Sh.So, 512· 644·257 oo u dhiganta 23·8%; arrimaha la xiriira daryee lka Bulshada waxaa lagu qiyaasay inay ku baxdo ShSo 568·552·597 u dhiganta 11,0%; markii loo eego Sannadka 1982 waxaa ku siyaaday Sh,So, 100·177,015 u dhiganta 21·4%; Waa Miisaaniyad ku saleysan baahida Nabadge lyada iyo Difaaca Qaranka, Maamulka, Horumarinta Dhaqaalaha iyo daryeelidda Bulshada· Saad Miisaani yadda uga aragtaan, kharajka siyaadada ah xoogiisu wuxuu ka yimid bixinta deynta dibadda Difaaca iyo

Nabadgelyada, Horumarinta Dhaqaalaha iyo Bulshada

Miisaaniyadd walba waxay ka turjubaantaa xaa ladda dhaqaale iyo siyaadadeed ee dal kasta ku suban yahay, Miisaaniyadan idin hortaalana waxay ku cabbi rantahay borogaraamka naga siyaasadeed, marxalad da Dalku marayo iyo awoodayada dhaqaale. Inkastoo caddad ahaan ay Miisaaniyaddu u muuqato mid aad u korortay, hase ahaatee waa mid lagu soo habeeyey ciriiri Iyo baahida lagama maarmaanka ah (Restrict ions and austarity).

Dakhliga Sannadka 1983 wuxuu kan hadda dham maaday dheeryahay Sh.So. 1.244.501.516, waxaan ku talo jirraa in dakhligaa dheeraadka ah uu soo xeroodo aya doo xoogga la saari doono ururinta Cashuuraha, wax ka beddelid sharciyada Cashuuraha iyo dakhli aan caa di ahayn oo aan fileyno.

Shaqaalaha Wasaaradda Maaliyadda iyo Ciidanka Booliska waxaan u soo jeedinahayaa amaan ballaaran, sida hoogtada ah ee ay ugu mitidsan yihiin ilaalinta iyo ururinta Cashuuraha Qaranka, waxaanan si culus ugu guubaabinahayaa kuna adkeynahayaa inay sii xoojiy aan la dagaallanka cashuur la baxsiga si xaqqa uu waa jibay Dawladda Khasnaddeeda u soo galo. Cashuurta ilaalinteeda iyo bixinteeda waa waajibka koowaad ee aan caffis yeelan karin, maxaa yeelay dakhligu waa awoodda Dawladdu Qaranka ugu adeegto, dakhliguna wuxuu ka yimaadaa Cashuurta Sharcigu waajibiyey. Cid kasta waa ku farli inay ilaaliso Cashuurta Qaranka.

## FAALLADA DHAQAALAHA

Sida la wada ogsoonyahay, Dhaqaalaha Adduunka Dhibaato weyn ayaa ka taagan, dhibaatadaas oo badi deed ka timid wax soo saarka oo yaraaday iyo baahida Umadaha oo sii kordheysay, taasoo keentay in waddam mada intooda badan ay ciriiri xun kaga jiraan Miisaa niyadda Dibedda ee Lacagta Adag oo dhalisay in Wadda mo ladnaan jiray ay deyntii ku biirtay ka baxday xadka awoodooda oo ay bixin la'yihiin. Waddammada iyo ku wa kale oo lagu yiqiin dhaqaale wanaagsan inay ku ka

liftay inay sarrifka dibedda ee lacagtooda ay dhowr jeer muddooyin gaaban gudahood hoos u dhigaan si ay ganacsigooda dibedda u geesi geliyaan marwalba. Maa daama ay dhibaatadii sii ballaaraneyso, waxaa hadda socota waanwaan ah in la kordhiyo raasumaalka Hay'adda lacagta ee Addunka (International Monetary Fund) si ay gacan fiican uga geysato dhibaatada lacagta adag ee Adduunka ka taagan. Dalkayaguna wuxuu ka mid yahay Adduun weynaha ay dhibaatada noocaas ahi haysato.

Sannadkan soo socda horraadkiisa, Dawladdu ayadoo kaalmeysanaysa Bankiga Adduunka iyo Hay'adda lacagta Adduunka ayey ku talo jirtaa in loo qabanqaabiyo shir lagu qabandoono Dalka Faransiiska, halkaa soo lagu shaandheyn doono sidii dib loogu dhigi lahaa deymanka Somaliya ku bislaaday ee aad culeys weyn u leh (deymankaasoo Dalku qaatay muddo dhowr iyo 20 sanno ka hor) iyo sidii loo habeyn lahaa maalgelin dhowr sannadood soconaysa ee lagu xoojiin doono wax soo saarka Warshadaha, Beeraha, Xoolaha iyo Kalluumeysiga. Aad baan ugu kalsoonnahay ka guulgaarka shirkaa, sabatoo ah barnaamijka dib u habeynta dhaqaalaha ee Dawladdu ku dhaqaaqday ayaa noo soo jiiday Sumcad iyo kalsooni heer sare ah oo waxaan ku muuqannaa Dawlad ay dhab ka tahay inay si waxtar leh wax uga qabato dhaqaalaha Waddankeeda.

Sannadkan dhammaadka ah iyo kii ka horreeyeyba waxaa socday barnaamijkii dib u habeynta dhaqaalaha kaasoo sii socon doona sannadka 1983 iyo kaddibba. Sannadkan bishii Luulyo waxaa la mideeyey sarrifka suuqa dibadda ee Shilinkayaga, mideyntaasi waxay ka dambeysay markii sannad lagu isticmaalahayey laba Suuq.

Faa'iidada mideyntaasi waxa weeye in meesha laga saaro makhaasiir fara badan oo ka imanaysay jiritaanka labadaa suuq iyo sii dhiirigelinta dibed u dhoofinta wax soo saarka dalka gudihiisa. Dabcan wax ka beddelka sarrifka keliya kuma filla xoojinta tacab soo saarka

ee waa in mar walba ascaar macquul ah lagu geesi geli yaa mira soo saarka beeraha, taasoo Dawladdu horay u suuragelisay hadda kaddibna ay fiira gaar ah siin doon to. Maceeshadda iyo waxa qofka noloshiisa muhiim u ah helitaankooda cadaddooda ayaa marwalba xaddada heerka ascaarta, saa awgeed xoojinta wax soo saarka gudaha waa lagama maarmaan si sicirbararku hoos ugu dhaco.—

Joojintii habka Faranka Falutada, isbeddelkii sar rifka, dhiirigelintii dibed u dhoofinta ictimaad u furIdda dibedda waxa looga baahanyahay iyo ascaar ku geesi gelinta wax soo saarka miraha beeraha waxay dhaliy een in sicirbararkii heerkiisu marahayey 66% Sannad kii 1980 uu sannadkan dhammaadka ah marahayo24% Qorshuhu waxaa weeye in sannadka 1983 sicirbararku hoos u sii dhaco, ayadoo aan rajaynayno in roobkuna fiicnaado si daaqa iyo beerahaba u wanaagsanaadaan sida labadii sanno ee na soo dhaaftay.

Did u habeynta dhaqaalaha waxaa ka mid ah qalab ka iyo dayactirka Warshadaha, Beeraha Gaadiidka iyo guud ahaan tacab soo saarka oo helintaankooda mud naanta kowaad la siiyo. Kol haddii dhaqaalaheennu ka koobmo hanti Dawladeed iyo hanti gaar ahaaneed, wa xaa lagama maarmaan ah in si buuxda loo wada taagee ro loona wada fidiyo wax alla wixii gacan qabad ah.

Dhaqaalaha Dalku wuxuu ku horumari karaa oo ka le, ayadoo la sii adkeeyo geesigelinta maalqabeennada ajnebi, oo lagu soo jiido inay Dalka maaLgashadaan si gaar ahaaneed iyo haday doonayaan inay wax la qabsa laan hay'ad Dawladeed ama qayb ka mid ah shacbiga. Dawladdu waa ay geesigelineysaa waana soo dhowey naysaa ciddii doneysa inay dalka maalgashato, shuruu cdii sahli lahaana waa ay jiraan.

Guddi ayey Dawladdu u saartay si loo saxo maamu lka Wakaaladaha kuwii ku muuqda inaysan socon karin na laga takhalusi doono, sidii horayba ay u dhacday waa

teynu heer Dawladeed iyo heer Xisbiba Siyaasad ahaan u goosannay in Wakaalad iyo Hay'ad kasta oo dhaqaale loo dhisay ay isna bixiyaan faa'iidana soo xareeyaan, Haddii ay waajibkaa gudan waayaan, in irdaha loo xi raa maxaa yeelay sabab ay u jiraan ma taal, Iney deyn ku noolaadaan mooyee, taasina macquul ma aha.

Waxaa xusnaan weyn mudan in sannadkan bishii Luulyo la Go'aansaday Dawlad Xisbi iyo Barlamaanba ku talagalka qorshaha 5ta sano ee Qaranka. Wasaarad da Maaliyaddu si joogta ah ayey ula shaqeyn Wasaarad da Qorshahatiyo Wasaaradaha leh fulinta mashaariicda Qorshaha ku jira si Qorshaha 5ta sannadood ah looga gaaro natiijadii laga lahaa.

Wasaaradaha dhaqaalaha hawshooda caadiga ah ka sokow, waxay hirgelinahayaan mashaariic lixaad leh, kuwaasoo fulintooda qaybta Dawladda kaga soo aaday sannadkan ay kor u dhaaftay Sh.So. 410 Milyan oo ka mid ah ku talagalka 1983 ee Miisaaniyadda. Taa waxay caddeynaysaa in si xoog leh la isugu garabwado horumarinta dhaqaalaha Dalka iyo difaaca Qaranka oo waa laba arrimood oon kala hari karin, haddaan nabad gelyo jirin dhaqaale suurtagal ma noqon karo, haddaan dhaqaale jirin nabadgelyo suurtageli karta. Waa gacnna tacab soo saarka ku haya, gacanna difaaca ku haya.

SOOMAALIYA HA NOOLAATO

WAAD MAHADSANTIHIIN